XUQUUQDA SHAQAALAHA

EE HOOS TIMAADA XEERKA XIRIIRADA SHAQAALAHA QARANKA

Xeerka Xiriirada Shaqaalaha Qaranka (NLRA) wuxuu dammaanad qaadaa xaqqa ay shaqaalaha u leeyihiin inay is abaabulaan si wadajir ahna ula gorgortamaan loo shaqeeyahooda iyo inay sameeyaan arrimaha kale ee sida guud loogu dhowray sharciga. Shaqaalaha uu quseeyo sharciga NLRA waxaa laga ilaalinaa dhaqan xumada qaarkeed ee loo-shaqeeyaha iyo ururada shaqaalaha. Wargelintaan ayaa kaa siinayso macluumaad guud oo ku saabsan xuquuqdaada iyo waajibaadka kaa saaran loo shaqeeyaha iyo ururada shaqaalaha ee ku qoran sharciga NLRA. La xiriir Guddiga Xiriirada Shaqaalaha Qaranka (NLRB) oo ah hay'adda dowladda u qaabilsan baaritaanka iyo xallinta cabashooyinka hoos yimaada sharciga NLRA adigoo adeegsanaayo macluumaadka hoos ku qoran, haddii aad qabtid su'aalo ku saabsan xuquuqda qarkeed ee la xiriirta goobtaada shaqada.

Sida ku qoran Xeerka NLRA, waxaad xaq leedahay inaad:

- Abaabusho urur shaqaale oo kala gorgortama loo shaqeeyahaaga dhinaca mushaarka, saacadaha shaqada iyo shuruuradaha kale ee xaaladaha shaqada.
- Sameyso, ku biirto ama caawiso urur shaqaale.
- Si wadajir ah ula gorgortantaan qandaraas ahaan loo shaqeeyihiina iyadoo loo marayo wakiilka shaqaalaha doorteen si aad u go'aamisaan mushaarkiina, maslaxadiina, saacadihiina shaqo iyo xaaladaha kale ee shaqada.
- Ka xaajooto shuruudahaaga iyo xaaladahaaga shaqada ama la abaabulka urur shaqaale dadka aad la shaqeyso ama urur shaqaale.
- Wax la qabato hal ama ka badan oo ka mid dadka aad la shaqeyso si aad u hagaajisaan xaaladihiina shaqada iyadoo cabashooyinka shaqada la xiriira si toos ah loogu gudbinaayo loo shaqeeyihiina ama hay'adda dowladda idinkoo caawimo ka raadsanaayo urur shaqaale.
- Shaqojoojiso ama aad hareereyso goobta shaqojoojinta ka jirto, waxayna ku xiran tahay ujeedada iyo habka shaqojoojinta iyo hareereynta.
- Doorato inaadan sameynin howlahaan oo ay ku jiraan ku biiridda ama xubin ahaanshaha urur shaqaale.

Sida ku qoran Xeerka NLRA, waa sharci darro in loo shaqeeyahaagu:

- Kaa reebo inaad daneyso urur shaqaale waqtiga aan la shaqeynin, sida intaan shaqada lo soo gelin iyo marka laga baxo ama waqtiga nashada; ama inaad qaybiso qoraalada ururka shaqaalaha waqtiga aan shaqada lagu jirin ama aad ku qaybiso goobaha aan laga shaqeynin sida meelaha gawaarida la dhigto iyo qolalka nasashada.
- Ku weydiiyo taageeradaada ururka shaqaalaha ama howlgalada si uu kaaga niyad jebiyo ka qayb qaadashada howgalkaas.
- Kaa eryo shaqada, ama hoos kuu dhigo, ama ku bedelo ama kaa yareeyo saacadaha shaqada ama kaa bedelo waqtiga

Sida ku qoran Xeerka NLRA, waa sharci darro in urur shaqaale ama ururka shaqaalaha adiga wakiilka kaaga ah la gorgortanka loo shaqeeyahaaga ay:

- Kuugu hanjabaan in shaqada lagaa eryaayo haddaadan taageerin ururka shaqaalaha.
- Kuu diidaan in wax laga qabto ciilkaabkaaga sababtoo ah waxaad dhaliishey maamulka ururuka shaqaalaha ama xubin kama tihid ururka shaqaalaha.
- Adeegsadaan ama leeyihiin nidaam takoor ah marka
- shaqaalaha loo diraayo goobaha shaqo qorista.
- Sababaan ama isku dayaan in loo shaqeeye ku takoor
- waxqabadkaaga la xiriira urur shaqaale awgeed.

shaqada ama uu sameeyo ficil lid kugu ah ama kuugu hanjabo inuu kugu sameynaayo arrimahaan sababtoo ah waxaad ku biirtay ama taageertay urur shaqaale, ama waxaad ka qayb qaadatay wanaag loo siman yahay iyo is ilaalin ama waxba ma aadan sameynin.

- Kuugu hanjabo inuu xiraayo goobta shaqada haddii haqaalaha doortaan in urur shaqaale wakiil ka noqdo.
- Kuu ballan qaado dalacsiin ama mushaar kordhin ama maslaxado kale si uu kaga niyad jebiyo ama kuugu dhiiriyo inaad taageerto urur shaqaale.
- Kaa reebo inaad ku xirato goobta shaqada koofiyadaha, guluusyada,shaatiyada iyo biinasha ururka shaqaalaha duruufo qaas ah dartood mooyaane.
- Basaaso ama film ka duubo howlgalada nabadeed ee ururka
- haqaalaha iyo kulamadooda ama iska dhigo qof sameynaayo.
- Qaataan mowqif adiga kaa soo horjeeda sababtoo ah waxaad ku biirtay ama taageertay urur shaqaale.

Haddii adiga iyo dadka kula shaqeeya doorataan in urur shaqaale wakiil idinkaga noqdo gorgortanka si wadajir ah, waxaa looga baahan yahay in loo shaqeeyihiina iyo ururka shaqaalaha u gorgortamaan si daacad ah oo dadaal dhab ah leh si loo gaaro heshiis qoran oo lagu dejiyey shuruudaha iyo xaaladaha shaqada. Ururka shaqaalaha ayaa looga baahan yahay in si cadaalad leh wakiil kaaga noqdo dhinaca gorgortanka iyo fulinta heshiiska.

Lama ogola dhaqan xumada sharci darrada ah. Haddii aad aamminsan tahay in xuquuqdaada ama xuquuqda kuwa kale lagu xadgudbay, waa inaad si degdeg ah ama muddo lix bilood gudahooda ah markuu ficilka sharci darrada dhacday ula xiriirtaa NLRB si aad u ilaaliso xuquuqdaada. Waad wareysan kartaa si aad u ogaato xadgudubyada dhici kara iyadoon loo sheegin loo shaqeeyahaaga ama cid kale. Qof walba ayaa dacwadda xareyn kara mana loo baahna inuu xareeyo qofka lagu xadgudbay. Guddiga NLRB baa ku amri kara loo shaqeeyaha inuu dib u shaqaaleeyo qofkuu shaqada kaga eryey si xadgudub ah iyo inuu siiyo musharka iyo manfaca ka maqnaa iyo in loo shaqeeyaha iyo ururka shaqaalaha joojiyaan ku xadgudubka sharciga. Shaqaaluhu waa inay ka raadsadaan taageero xafiis goboleedka NLRB ee ugu dhow kaasoo laga helo karo bogga Internet-ka ee hay'adda: **www.nlrb.gov**

Riix cinwaanka "About Us" ee ku jira bogga Internet-ka NLRB kaa soo aad ka heleyso macluumaadka xafiisyada dhow ee NLRB. Waxaad kaloo kala xiriiri kartaa hay'adda NLRB adigoo waca telefoonka lacag la'aanta ah **ee 1-866-667-NLRB (6572)** ama (**TTY) 1-866-315-NLRB (6572)** oo loogu talogalay dadka dhagaha jiga ama dhagooleyaasha.

*Xeerka Xiriirada Shaqaalaha Qaranka waxaa inta badan hoos yimaada loo shaqeeyayaasha gaarka loo leeyahay. Waxaa sharciga NLRA ka baxsan shaqaalaha dowladda, beeraleyda iyo kuwa guryaha ka adeego, qandaraasleyaasha madax bannana, shaqaalaha ay shaqaaleeyeen waalid ama qoys, shaqaalaha dayuuradaha iyo tareenada oo hoos yimaada Xeerka Shaqaalaha Tareenada, iyo kormeerayaasha (maadaama kormeerayaasha lagu takooray diididda ku xadgudubka sharciga NLRA ay soo hoos geli karaan Xeerkan).

Kani waa Wargelin Dowladeed oo rasmi ah
ee qofna yuusan foolxumeynin.

Wasaaradda Shaqada Dalka Mareykanka